

[**Employers:** This is a sample notice employers can use to inform workers about the Safe Workplaces for Meat and Poultry Processing Workers Act as well as the Packinghouse Workers Bill of Rights, as required under Minnesota Statutes § 179.877.]

Xuquuqdaada marka aad tahay shaqaalaha goobaha baakadaynta hilibka ama shaqaalaha ka shaqaynta digaaga

Sharciga Xuquuqda Shaqaalaha Goobaha Baakadaynta (Minn. Stat. § 179.86) iyo Badbaadada Goobaha Shaqada ee Sharciga ka Shaqaaynta Hilibka iyo Digaagga (Minn. Stat. § 179.87 ilaa 179.877) ayaa siinaya ilaalinaha goobta shaqada ee soo socota shaqaalaha ka shaqaynta hilibka iyo digaaga:

- **Waxaad xaq u leedahay inaadku badbaado iyo caafimaad qabto goobta shaqada.** Loo-shaqeeyahaagu waa inuu leeyahay barnaamijka ergonomics oo ay sameeyeen guddi. Loo-shaqeeyahaagu waa inuu kuu tababaro sidii si badbaado leh ugu qaban lahayd howlaha cusub; Tababarkani waa inuu ahaadaa mid lagu bixiyo luuqad iyo erarayo aad ku fahmi karto. Loo-shaqeeyahaagu waa inuu ku siiyo ugu yaraan siddeed saacadood oo tababar badbaado ah sannad kasta oo ku saabsan caafimaadka iyo badbaadada mawduucyada la xiriira shaqadaada iyo howsha shaqadaada; Tababarkani waa inuu ahaadaa mid lagu bixiyo luuqad iyo erarayo aad ku fahmi karto. Ugu yaraan laba saacadood oo tababarkaaga ah waa in ay ku saabsanyihiin ka-hortagga dhaawaca habshaqaynta iyo hababka ka soo warbixinta dhaawacyada. Loo shaqeeyahaagu waa inuu ku siiyo wakhti kugu filan oo aad ku isticmaasho musquusha, ku dhaqdo gacmahaaga oo aad ku gashato oo aad iskaga bixiso qalabka ilaalinta.
- **Waxaad xaq u leedahay inaad diido inaad ku shaqeyso meelo xaalado khatar ah.** Haddii aad diido inaad ku shaqeyso xaalado khatar ah, waa inaad sii wadato helitaanka mushaharka oo aan lagugu samayn takoorid ama aargoosi.
- **Waxaad xaq u leedahay ilaalinta badbaadada la xoojiyay inta lagu jiro xaalad caafimaad oo degdeg ah.** Loo shaqeeyahaagu waa inuu bixiyo tallaabooyin caafimaad oo la xoojiyay ee badbaadada iyo fayadhowrka inta lagu jiro wakhtiga nabada ee xaaladaha degdegga ah ee caafimaadka dadweynaha ee la xiriirta isu gudbinta hawada. Tallaabooyinkan waxaa ka mid ah, laakiin aan ku xaddidnayn, kala fogaanta jirka, xanibaadaka kala xirka, bixinta maaskarada wejiga iyo gaashaan bilaash ah, jeermiska ka dilista goobta shaqada iyo waxyaabo kale oo badan.
- **Waxaad xaq u leedahay inaad si wada jir ah isu abaabushaan oo aad u gorgortantaan.** Wixa kale oo aad xaq u leedahay in aad ka fogaataan is abaabulka iyo u gorgortanka si wadajir ah. Wixii macluumaad dheeraad ah, kala xiriir Guddiga Xiriirkha Shaqaalaha ee Qaranka (National Labor Relations Board) 612-348-1757.
- **Waxaad xaq u leedahay inaad xor ka tiihin in la idinku sameeyo takoorka shaqada.** Waxaad xaq u leedahay in aad xor ka ahaato takoorka ku salaysan isir, midab, caqiido, diin, asal qaran, jinsi, xaalad guur, naafonimada, heerka kaalmada dadweynaha, da'da, jinsi doorashada, aqoonsiga jinsiga, xaalada qoyska iyo hawlaha la xiriira guddiga xuquuqul insaanka ee deegaanka. Wixii macluumaad dheeraad ah, kala xiriir Waaxda Xuquuqul Insaanka ee Minnesota 833-454-0148.

- **Waxaad xaq u leedahay inaad isticmaasho caymiska magdhawga shaqaalaha.** Haddii loo-shaqeeyahaagu looga baahan yahay inuu haysto caymiska magdhawga shaqaalaha, waxaad xaq u leedahay inaad hesho in caymiskaas caawiyo bixinta daboolida shilka ama dhaawaca kaa soo gaara goobtaada shaqada. Wixii macluumaad dheeraad ah, kala xiriir Xafiiska Dhexdhexaadiyaha Magdhawga Shaqaalaha (Ombudsman) 651-284-5013 ama dli.ombudsman@state.mn.us
- **Waxaad xaq u leedahay inaad xor ka tiihin in la idinku sameeyo ka aangoosasho.** Loo-shaqeeyahaagu waxa laga yaabaa in uuna kaa aangoosan, ama uuna qaadin tillaabo xun, oo lid kugu ah, maadaama aad gudatay xuquuqahaaga sida uu dhigayo Xeerka Badbaadada Goobaha Shaqada ee Sharciga ka Shaqaaynta Hilibka iyo Digaagga

Wixii macluumaad dheeraad ah

La xiriir Waaxda Shaqada iyo Warshadaha ee Minnesota Qaybta Halbeegyada Shaqada 651-284-5075 ama dli.laborstandards@state.mn.us si aad su'aalo u weydiiso ama u gudbiso cabasho. Shaqaalaha iyo dadka kale waxay sidoo kale xarayn karaan dacwad saddex sano gudahood ah marka lagu xad gudbo Badbaadada Goobaha Shaqada ee Sharciga ka Shaqaaynta Hilibka iyo Digaagga.

Dukumeentigan waxaa ku jira macluumaad muhiim ah oo ku saabsan shaqadaada. Calaamadi sanduuqa bidix si aad uguu hesho macluumaadkan luqaddan.

Spanish/Español	Este documento contiene información importante sobre su empleo. Marque la casilla a la izquierda para recibir esta información en este idioma.
Hmong/Hmoob	Daim ntawv no muaj cov xov tseem ceeb hais txog thaum koj ua hauj lwm. Khij lub npauv ntawm sab laug yog koj xav tau cov xov tseem ceeb no txhais ua lus Hmoob.
Vietnamese/Việt ngữ	Tài liệu này chứa thông tin quan trọng về việc làm của quý vị. Đánh dấu vào ô bên trái để nhận thông tin này bằng Việt ngữ.
Simp. Chinese/简体中文	本文件包含与您的雇用相关的重要信息。勾选左边的方框将接收以这种语言提供的信息。
Russian/русский	Данный документ содержит важную информацию о вашем трудоустройстве. Отметьте галочкой квадрат слева для получения этой информации на данном языке.
Somali/Soomaali	Dukumentigan waxaa ku qoran macluumaad muhiim ah oo ku saabsan shaqadaada. Calaamadi sanduuqan haddii aad rabto inaad macluumaadkan ku hesho luqaddan.
Laotian/ພາສາລາວ	ເອກະສານນີ້ມີຂໍ້ມູນທີ່ສໍາຄັນກ່ຽວກັບການຈັງງານຂອງທ່ານ. ກວດເບີງກ່ອງທີ່ຢູ່ເບີ່ອງຊ້າຍເປື້ອຂັ້ນມູນນີ້ໃນພາສານີ້.
Korean/한국어	이 문서에는 귀하의 고용 형태에 관련된 중요한 정보가 담겨있습니다. 이 언어로 이 정보를 받기를 원하시면 왼쪽 상자에 체크하여 주세요.
Tagalog/Tagalog	Ang dokumentong ito ay nagtataglay ng mahalagang impormasyon tungkol sa iyong pagtatrabaho. Lagyan ng tsek ang kahon sa kaliwa upang matanggap ang impormasyong ito sa wikang ito.
Oromo/Oromoo	Waraqaan kun waayee hojii odeeaffannoo barbaachisoo ta'an qabatee jira. Saaxinnii karaa bitaatti argamu kana irratti mallattoo godhi yoo afaan Kanaan barreeffama argachuu barbaadde.
Amharic/አማርኛ	ይህ ዘመንናት አቀማበሮን በሚመለከት አስፈላጊ መረጃ የዚህ ነው፡፡ ይህንን ዘመንናት በሰተኞች በነፃ ብለው ተንተዋዋም አንድስተት ካልፈላጥ በዘመኑ በሰተኞች በነፃ ባለው አገልግሎት የዚህ ነው፡፡
Karen / ကမ္ဘာ့	လိုတိလိုပိတ်ခံပေါ်ယှဉ်တို့တို့ကိုအကျိုးကိုချို့ယှဉ်လောက်သိနိုင်ပါ။ တို့နှိုင်တို့တို့ကိုအကျိုးကိုချို့ယှဉ်လောက်သိနိုင်ပါ။
Arabic/العربية	يحتوي هذا المستند على معلومات مهمة حول عملك. ضع علامة في المربع على اليمين للحصول على هذه المعلومات في هذه اللغة.